

## Ku saabsan Ururukeena

Isbaheysiga Guri la'aanta ayaa hormuud u ahaa inay udoodaan dadka guri la'aanta ee Louisville tan iyo 1986, markii uu ururkani la aas aasay si loogu jawaab-celiyo arrinta sii kordheysa ee guri la'aanta.

### Nala soo Xariir

**Taleefan::** (502) 636-9550

**Qabso Sariir:** (502) 637-BEDS

**Boga:** www.louhomeless.org

**Cinwaanka:** 1300 S 4th St. #250

Louisville, KY 40208

## Joojinta Heshiishka Kiradaada

### Joojinta Heshiishka Bisha ah.

U dir mulkiilahaaga ogeysiis qoraal ugu yaraan 30 maalmood kahor oo aad ku war bixinayso inaad joojinayso heshiiskan.

### Joojinta Heshiishka Isbuuca ah

U dir mulkiilahaaga ogeysiis qoraal ah ugu yaraan 7 maalmood ka hor wakhtiga kirada  
Aad usheegeyso inaad joojinayso heshiiska

### Joojinta heshiska dheer

Heshiiskaaga ayaa ku siin doona macluumaad gaar ah oo ku saabsan joojinta.  
Waxaa jiri karta in lagug cigaabi karo joojinta kirada, Ka dib marka ay muddada aad ku heshiiseen dhammaato,  
Heshiiskana aadan cusboonaynin, waxaad ka dhigan kartaa mid bil bil ah.

## Macluumaad Dheeraada

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu u baahan yahay ka caawin guri ka guurid, la xidhiidh Legal Aid Society (LAS) lambarkan (502) 584-1254

Legal Aid Society waxay bixisaa adeegyada sharci bilaash kuwa u qalma.

Maadama buug-yarahani uusan daboolin wax walba, waxay kaa caawin kartaa inaad ogaato maxaa dhib kaaga iman kara hadhow. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo ilaali naftaada kirayste ahaan, iskaan karee QR code hoose si aad u aragto "Buugga Xuquuqda Kiraystayaasha"



iskaan karee  
Buugga Xuquuqda  
Kiraystayaasha



ESPAÑOL  
KISWAHILI  
FRANÇAISE  
SOMALI  
TIẾNG VIỆT  
العربية



Ma Guuraysaa?

## Talaabooyink a marka aad guuraysid



COALITION  
FOR THE  
HOMELESS

## Talaabooyinka

1. AKHRI heshiiskaaga si aad uhubiso inaad jabin heshiska
2. Sameeso LISTIGA waxyaabaaha aad ubahantahay markaad guurayso
3. Sii mulkiilahaaga OGAYSIIS .
4. NADAAFI guriga
5. Ka qaad SAWIRO guriga.
6. Ha kula EEG EEGO mulkiilaha guriga
7. Kusoo wareeji FURHAAGII.
8. Mar haddi furaha lagaaga wareego, lahaanshaagu waa uu dhamaaday




## **Iska eeg waxyaabahan!**

- Dhulka
- Darbiyada
- Khaanadaha
- Daaqadaha
- Baafka
- Alaabta
- Balkoonada (haday jiraan)
- Marwaxadaha
- Iridaha

## HALAYS VS DHAMAAD

Milkiilayaasha guryaha kama jari karaan deebaajigaaga si loo hagaajiyo waxyaabaha guriga ka dhamaaday. Shaygu inuu dhamaado waa caadi.



### Halawga

- Rooga oo gubto ama la wasakheyo
- Duleelaha Darbiyada
- Alaabta la jabiyo
- Daaqadaha jabsan
- Mutuleelka jabsan
- Rinjiga amar laan lasameeyo
- Khaanada jabsan

### Waxyaabaha Dhamaada

- Dhulka oo xagtimo yar leh
- Rooga oo dhamaado
- Daaha cadaado
- Iridaha alabaabka jilcaan
- Rinjiga oo dhamaada
- Mutuleel wasakhaysan
- Khaanada oo dhamaada

## **Ka hor intaadan ka bixin, ADIGA iyo MULKIILAHABA waa inaad eeg eegtan!**

- Si taxadar leh adiga iyo Mulkiilaha waa inaad kormeertaan xaalada guriga.
- Haddii aan lagu ogolayn inaad kormeerto, ama mulkiilahaagu aanu kormeerin,

- mulkiiluhu kaama reeban karo deebaajigaaga. Haddii ay jiraan waxyeelooyin ka baxsan dhamaadka caadiga ah, mulkiilahaagu waa inuu ku siiyaa qiyaasta kharashka dayactirka KA HOR inta aan lagu dalacin.

**\*Waxa fiican inaad ku dirto ogeysiis kasta mulkiilahaaga boosta sharciyeesan si aad u hubiso inuu helay ogeysiiskii.**

**\* Waxii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan joojinta heshiiskaaga waa inuu ku jiraa qaybta heshiiska.**

**Haddii aad heshiiskaaga kahor waqtigii lagu heshiiyo adiga ayaa mas'uul ka ah bixin kirada.**